


Waxaa muhiim ah in **haweenka oo dhan**, ayadoon loo eegin luqadda ay ku hadlaan ama inta ay jooheen Australia, waa inay **qaataan Baaritaanka Afka Ilmo-Galeenka 5tii sanoba** mar.



Waa maxay iska-qaadiddu?

Iska-qaadidda Baaritaanka Afka Ilmo-Galeenka (Cervical Screening Test) waa marka haweeney ay iska qaaddo tijaabadeeda ayadoo isticmaalaysa tirista suufka. Baaritaankaan waxaa si gaar ah loogu sameeyaa goobta dhakhtarka ama goobaha kale ee caafimaad waxaana badanaa lagu sameeyaa gadaalka ama shaashadda ama musqusha.

Waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelatid iska-qaadidda haddii:

- ay da'daadu tahay 30 jir iyo ka weyn, iyo
- ayna kaa dhacsan tahay Baaritaanka Afka Ilmo-Galeenka illaa laba sano, iyo
- inaad ku dhahday maya baaritaanka Afka Ilmo-Galeenka oo ka yimid xirfadle caafimaad.

Dumarka oo dhan uma xaq lahan Iska-qaadidda Baaritaanka Afka Ilmo-Galeenka sidaas darteed waa muhiim inaad marka hore dhaqtarkaaga kala hadashid.

Wixii macluumaad dheeraad ah

Wac **13 11 20** wixii macluumaad kansar ah iyo taageero. Haddii aad jeceshahay inaad kula hadasho qof ku hadla luqaddaada, fadlan wac **13 14 50** oo weydiiso Cancer Council Victoria.

Si aad u ballansato Baaritaanka Afka Ilmagaleenka, la hadal dhaqtarkaaga ama kalkaalisada.

Ka eeg www.cancer.org.au/cervicalscreening

Diseembar 2018
Baaritaanka Afka Ilmo-galeenka wuxuu muhiim u yahay haweenka oo dhan. SOMALI



Baaritaanka
ilmo-galeenka
ayaa muhiim u ah
dumarka oo dhan.



Kansarka afka ilmo-galeenka iyo human papillomavirus (HPV)

Kansarka afka ilmo-galeenka waa kansar ilmo-galeenka. Afka ilmo-galeenkaagu wuxuu ku dhex jiraa siilkaaga wuxuuna ku yaalaa afka hore ilmo-galeenkaaga (womb).

Dhammaan kansarka afka ilmo-galeenka waxaa keena HPV. HPV waxay u taagan tahay human papillomavirus waana cudur faafa badanaa kaasoo aan muujin calaamado muuqda. Fayraska waxaa lagu gudbiyaa xiriirka galmada waxaana qaadi karaa ragga iyo haweenkaba labadaba.

Jirku wuxuu si dabiici ah isaga qaadi karaa infekshanka HPV inta badan laakiin haddii uusan sidaan ahayn, noocyada HPV qaarkood waxay keeni karaan isbeddelo unugyada afka ilmo-galeenka. Haddii isbeddelada unugyada aan hore loo soo ogaan waxay u noqon karaan kansarka afka ilma-galeenka.

Sidee loo helaa HPV?

Baaritaanka Afka Ilma-Galeenka waa habka ugu fiican ee loo baadho HPV. Dhaqtarka ama kalkaalisada ayaa ku siin kara baaritaanka afka ilmo-galeenka.


Miyaan u baahanahay Baaritaanka Afka Ilmo-Galeenka?

Haddii aad tahay qof haween ah oo da'deedu tahay 25-74 jir -oo waligeed gashay xiriir galmo, waxaa lagugula talinayaa in lagaa qaado baaritaanka Afka Ilmo -galeenka shantii sano mar.

Baaritaanka Afka Ilmo-Galeenka ayaa wali loo baahan yahay haddii aad:

- qaadatay tallaalka HPV
- dhaaftay dhalmo-dayska
- leedahay hal wadey galmo oo kaliya
- yeelatay goyn dhaqaneedka gudniinka
- aad ilmo dhashay
- aad guursatey
- Lagu furay
- Garoob noqotay.

Kansarka ku dhaca afka ilmo-galeenka waa mid ka mid ah kansarada laga hortagi karo.



Baaritaanka afka ilmo-galeenka iyo jarista taranka dheddigga (FGC)

Waayo-aragnimada FGC-da ayaa mararka qaarkood ka hor istaagi karta haweenka inay qaataan Baaritaanka Afka Ilmo-galeenka. Waxaa laga yaabaa inay ku caawiso:

- ogsoonow in ballantu tahay mid gaar ah oo qarsoodi ah
- wado qof qaraabo ah ama saaxiib ah oo kaa caawiya inaad dareentid raaxo
- weydiiso kalkaalisada ama dhaqtarka haweenka ah
- weydii kalkaalisadaada ama dhaqtarkaaga wax ku saabsan baaritaanka ka hor inta uusan dhicin
- jooji ama haki baaritaanka waqti kasta
- waydiiso maro lagu saaro inta lagu jiro baaritaanka.